



Heshiiska isticmaalka ee Legimus, MTM maktabadeeda dijitalka

Legimus waa Hey'adda dawladeed ee warbaahinta la heli karo, maktabada MTM. Halkan waxaad ka soo dejisan kartaa buugta la dhegaysto kana amaahan kartaa buugta qoraalka ah iyo qaar kale. Waxaad heli kartaa macluumaaad ku saabsan wawa MTM bixiso oo aad heli kartaa talooyinka buugta.

- Buugtani waxay ku dhawrsanyihiin sharciga xuquuqda asalnimada oo waxa keliya isticmaali kara dadka iyadoo ay sabab u tahay hoos u dhax laxaadka ah ay ku adagtahay inay akhriyaan qoraalka daabacan.
- Markaad soo dejisato buuga la dhagaysto ama aad dhigato khaanada buugaagta waxay taasi xisaabsantahay amaah. Wakhtiga amaahda waa 6 bilood. Adigu waxaad soo celinaysaa buugan iyadoo loo marayo in la masaxo.
- Macluumaaadka gelitaanka iyo buugtan waxaa loogu talogalay isticmaalkaaga gaar ahaneed oo ma la oggola in loo dhiibo dad kale.

Maxaa dhacaya haddii anigu aan jebiyo heshiiskan?

- Haddii aad jebiso heshiiskan waxaad waayi kartaa xaqa in la isticmaalo adeegan.
- Faafinta sharci darada ah ee buugta la dhegaysto waa dembi ka soo horjeeda sharciga xuquuqda asalnimada oo waxay keeni kartaa dacwad ku soo oogid. Marka buugta la dhegaysto la soo dejisto waxay ku calaamadsamaan macluumaaadka ku saabsan qofka amaahday buugan la dhegaysto. Markay dhacdo faafin sharci daro ah waxay MTM raad raac ku heli karaan qofka amaahday buugan la dhegaysto.

Ilaalinta macluumaaadka

MTM waxay kaydisaa oo isticmaashaa ilmahaaga iyo caruurtaada macluumaadkooda shakhsiga ah si waafaqsan sharciga ilaalinta macluumaaadka (GDPR, 2016/679/EU). Magaca, cinwaanka e-mail-ka iyo tobanka lambar ama taariikhda dhalashada iyo lambarka kaarka LMA waxaa lagu diiwaan geliyaa gudaha MTM diiwaankeeda isticmaalayaasha. Magaca, cinwaanka e-mail-ka iyo tobanka lambar ama taariikhda dhalashada iyo lambarka kaarka LMA waa inay mar kastaba ku jiraan diiwaanka isticmaalayaasha. MTM ma bixin karto xisaab haddii adigu aad ka soo horjeedo diiwaan gelin noocan ah.

Macluumaaadkan waxaa loo isticmaali karaa si loo fuliyo baaritaanada tirakoobka iyo qiimeynta adeegyadayada. Adigu waxaad mar kastaba xaq u leedahay inaad diido in lagula soo xiriyo xilliga baaritaanadan. Tani waxaa loo maraa dhinaca "Mina sidor" oo laga helo legimus.se ama iyadoo lala xiriyo maktabadaada.

Dadka macluumaadkooda shakhsiga ahi qarsoodiga yahay waxay codsan karaan in lagu maareeyo gudaha qayb qarsoodi ah oo ka tirsan diiwaankan. Halkaasi waxaa lagu diiwaan-geliyaa oo keliya tobanka lambar iyo cinwaanka e-mail-ka ama taariikhda dhalashada, lambarka kaarka LMA-ga iyo

cinwaanka e-mail-ka. Waa keliya tiro dad ah oo xadidan oo jooga MTM kuwa arki kara macluumaadkan.

Akrhi dheeraad ku saabsan sidaanu u maarayno macluumaadka shakhsiga ah dhinaca siyaasadayada badbaadada. Tani waxaad adigu ka helaysaa www.mtm.se/hantering-av-personuppgifter/

MTM waxay xaq u leedahay in dhinaca sabab la qeexay ay baddasho qawaaniinta isticmaalka. Istimcaale ahaan dhinaca Legimus waxaa waajib kaa saaranyahay in aad iskaa ugu dadaasho inaad ka warhayso isbaddelada iyo iyadoo bilaa daahid ah haddii aad ka soo horjeedo isbaddeladan aad wargeliso MTM adeegeeda jawaabaha. Haddii aad ka soo horjeedo isbaddelkan tani waxay tahay in helitaanka Legimus ku joogsan karo dhinaca MTM dalabkeeda.

Anigu waxaan u hogaansamayaan inaan raaco heshiiskan oo aan ka warhayo wixi isbaddelo ah ee iman kara.

Heshiiskan waxaa dib loo cusboonaysiiyay 2018-05-22 oo wuu shaqaynayaa si joogto ah.